



## **DIGNIINTA QANJO BARARKA**

### Ogaysiis Muhiim ah oo ku socda Waalidka iyo Masuulada

*Febraayo 10, 2017*

Maamulka dugsiga waxa uu jeclaan lahaa inuu kugu wargeliyo wax ku saabsan korodhka xaaladaha cudurka qanjo bararka (qamoo- qashiirka) gudaha Colorado. Laga bilaabo Febraayo 8, waxaa jiray 27 xaaladood oo qanjo bararka ah gudaha Colorado, oo tiradana waxaa la filayaa inay korodho. Si loo yareeyo ku faafida qanjo bararka gudaha dugsiyada, Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha iyo Deegaanka Colorado waxay na waydiisatay inaanu bixino macluumaadka soo socda.

Cudurka qanjo bararka (Qamoo- qashiirka) waa cudur fayras leh oo sababa barar xanuun leh oo ah mid ama in ka badan oo qanjidhada dheecaanka ah, xummad aad u hoosaysa, iyo madax xanuun. Caadi ahaan, dadka qaba qanjoo bararka waxaa barara qanjidhka candhuufka ee ku yaala aaga dhabanka ee u dhow dhegta iyo xaga dambe ee xagasha daanka. Dadka qaar qaba cudurka qanjo bararka ma yeelan doonaan astaamo dhammaanba. Cudurada soo raaca ee darrar qanjo bararku waa dhif, laakiin waxa ku jiri kara bararka maskaxda, ololka ilma galeenka ama xiniinyaha, ama dhego beel.

Cudurka qanjo bararka waxaa lagu faafiyaa qufaca iyo hindhisada ama taabashada tooska ah ee candhuufta qofka cudurka qaba, sida wadaagista koobabka ama weel wax kuwada cunista. Astamaha cudurka qanjo bararka caadi ahaan waxay kobcaan 16 ilaa 18 maalmood ka dib marka laga ag dhawaado qof qaba qanjo bararka. Dadka qaba cudurka qanjo bararka waxay ku faafin karaan fayraska 2 maalmood ka hor ilaa 5 maalmood marka bararka qanjidhku kobco.

**Fadlan la xidhiidh adeeg bixiyaa daryeelka ilmahaaga haddii ilmahaagu kobciyo wax barar qanjidhada ah ilaa dhegaha ama qoorta agteeda. Haddii adeeg bixiyaha daryeelka caafimaad uu u maleeyo ilmahaagu inuu qabo qanjo bararka, isaga/iyadda waxaa laga baadhi karaa qanjo bararka oo waa inuu guriga joogaa ilaa 5 maalmood ka dib marka bararka qanjahu bilaabmaan.**

Dhammaan ardayda (kindigaardanka ilaa fasalka 12naad) waxaa looga baahanyahay inay haystaan labba tallaal oo *ansax aho* Jadeecada ah, Qanjo bararka, Jadeeco Jarmalka (MMR) tallaalka gelida dugsiga, iyaddoo ka daynta tallaalka la soo gudbiyo mooyee. Tallaalka MMR waxaa caadi ahaan la bixiyaa 12-15 bilood jirka iyaddoo tallaalka kalana lagu siiyo gelitaanka dugsiga (4-6 sano jirka). Dadka dhasha ka hor 1957 maangal ahaan waxay qabaan cudurka qanjo bararka oo waxaa dhici karta inay iska caabiyaan qanjo bararka.

Fadlan dib u eeg diiwaanka tallaalka ilmahaaga si aad u habsato in ilmahaagu leeyahay tirada saxda ah ee tallaalka MMR ee ansaxa ah (1 tallaalka haddii uu ku jiro dugsiga barbaarinta iyo 2 tallaalka haddii dugsiga kindigaardanka ilaa kulliyada). Haddii aad caawimo uga baahantahay helitaanka diiwaanka tallaalka ilmahaaga, la xidhiidh adeeg bixiyahaaga caafimaad ama wac Nidaamka Macluumaadka Tallaalka Colorado (Colorado Immunization Information System) lambarkan 303-692-2437 ama 1-888-611-9918. La xidhiidh adeeg bixiyaha daryeelka caafimaad ee ilmahaaga ama waaxda caafimaadka maxaliga ah haddii aad u baahantahay tallaalka MMR.

Dadka qaatay labba tallaalka oo MMR ah waxay sagaal jeer ka yar yihiin inay qaadaan qanjo bararka dadka aan tallaalnayn ee cudurka qanjo bararka qaabka lagu qaado gaadhay. Si kastaba ha ahaatee, dadka qaarkood kuwaas oo qaata labba tallaalka oo MMR ah weli way ku dhici kartaa qanjo bararku, gaar ahaan haddii ay qabaan mid muddo dheeraaday, oo taabasho dhow oo qof qaba cudurka ah. Haddii qofka la tallaalay aanu qaadin cudurka qanjo bararka, waxay caadi ahaan leeyihiin jirro ka khafiisan ka aan la tallaalin.

**Haddii cudurka qanjo bararku saameeyo dugsigaaga oo ilmahaaga aanu si habboon u tallaalanayn, isaga/iyadda waa in laga saraa dugsiga ilaa 25 maalmood ama maalmo ka badan iyaddoo ku xidhan inta qof ee qaba cudurka qanjo bararka xaga dusiga.**

